## Waxaan ahay magangalyo doon cusub, laakiin ma haysto dukumiintiyo

**Waxaad samaynayso** Sharrax inaad wadankaagii kaksoo qaxday sabab la xiriirta inuusan ammaan ahayn aadna doonayso inaad magangalyo ka codsato Koonfur Afrika.

**Maxaa Dhacaya intaas Kaddb** Marka howshu halkaan marayso, waa in lagu sii daayaa si aad u codsato magangalyada laakiin waa lagu xiri karaa inta Wasaarada Arrimaha Guduhu (Home Affairs)kaa caawinayso ka codsashada magangalyada Xaafiiska Qaabilaada Qaxootiga (Refugee Reception Office)

**Ogaysiis muhiim ah** Waa inaad heshaa caawimaad sharci. Waxaad urur kala xiriiri kartaa boga 15 aad ee hagahaan.

## Waxaan haystaa fiise ama oggolaansho dhacay

**Waxaad samaynayso** Tus sarkaalka fiisahaaga magangalyada/ogolaanshahaaga, aqoonsigaaga qaxootinimada ama fiisahaaga dhacay una sharax sababta uu u dhacay.

**Maxaa Dhacaya intaas Kaddb** Marka howsho halkaan marayso, waa lagu xiri karaa. Waxaa lagu saari karaa ganaax ama waxaad qaadan kartaa xabsi. Caawimaad dhanka sharciga ah oo bilaasha ag ayaa laga heli karaa maxkamadda si ay kuu caawiso haddii laguugu eefeeyo inaad haysato fiisaha/ogolaanshaha magangayo doonka ama qaxootinimada oo kaa dhacay.



## Ma haysto dukumiintiyo sharci ah. Dukumiinti ma haysto.

**Waxaad samaynayso** U sharax sarkaalka sababta aadan dukumiintiyo ugu lahayn Koonfur Afrika

**Maxaa Dhacaya intaas Kaddb** Marka howsho halkaan marayso, waa lagu xiri karaa. Waxaa lagu saari karaa ganaax ama waxaad qaadan kartaa xabsi. Caawimaad dhanka sharciga ah oo bilaasha ag ayaa laga heli karaa maxkamadda si ay kuu caawiso haddii laguugu eefeeyo inaad haysato fiisaha/ogolaanshaha magangayo doonka ama qaxootinimada oo kaa dhacay.

**Ogaysiis muhiim ah** Waa inaad heshaa caawimaad sharci. Waxaad urur kala xiriiri kartaa boga 15 aad ee hagahaan.

## Waxaan codsaday magangalyo, laakiin waxaan helay diidmo kama danbays ah

**Waxaad samaynayso** Waa inaad codsataa in lagu siiyo wakhti kugu filan oo aad iskugu diyaarin karto inaad wadanka kaga tagto.

**Maxaa Dhacaya intaas Kaddb** Waa in lagu siiyaa 'amaraka bixitaanka', iyo wakhti u cayiman xiliga kama danbaysta ah ee lagaaga baahan yahay inaad ka baxdo Koonfur Afrika.

**Ogaysiis muhiim ah** Haddii aan lagu siin 'amarka bixitaanka' laguna xiro, islamarkiiba la xiriir ururada sharciga qaabilsan!

## Farqiga u dhexeeya xiritaanka maamulka iyo kan fal danbiyeedka ah

Talaabada 1aad ee nidaanka xiritaanka, hadii sarkaalka socdaalku rumaysanyahay inaad si "sharci darro ah" ku joogto Koonfur Afrika, waa inuu ku siiyaa foom sheegaya waxyaabahaan. Waraaqdaan, waxay kuu sheegaysaa Faqrada sharciga socdaalka ee laguugu soo dacweeyay. Section 34 waa xiris "maamul" oo loogu tala galay tarxiilka. Section 49 waa xiris "fal danbiyeed" loogumana tala galin tarxiil. Farqiga u dhexeeya noocyadaan xiritaanka hoos ayaa lagu faahfaahiyay:

### Xiritaanka fal danbiyeedka ah

Xiritaanka fal danbiyeedka ah wuxuu dhacaa marka laguugu soo eedeeyo fal danbiyeed, oo uu kujiro danbiga inaad wadanka kusoo gasho oo aad ku joogto si sharco darro ah. (Arintaani waxay soo hoos galaysaa Section 49 of the Immigration Act.) Arin walba oo ah fal danbiyeed, haddii aadan qareen awoodin, waxaad xaq u leedahay kaalmo sharci oo bilaash ah marka aad maxkamada joogto.

Haddii laguugu eedeeyo Section 49 of the Immigration Act laguuguna helo danbiga, waa inaad marka hore qaadataa xukun xabsi ah (2 - 4 sanno) ama aad ganaax bixisaa kahor inta aan lagu tarxiilin. Xaataa intaan kaddib, wali waa lagu xiri karaa ama mar kale ayaa lagu xiri karaa si laguu tarxiilo si waafaqsan Section 34. Xabsiga 120 ka maalmood ah wuxuu bilaabanayaa marka lagu xiro si laguu tarxiilo. Islamarkiiba raadso caawimaad sharci.

### Xiritaanka Maamulka ah

Xiritaanka maamulka ah wuxuu dhacaa marka lagu xiro si laguu tarxiilo kadib marka la ogaado inaad tahay "ajanabi sharci darro ah." (Arrintaani waxay soo hoos galaysaa Section 34 of the Immigration Act.) Haddii lagu xiro si waafaqsan farqadaan, waa inaad kasoo hor muuqataa maxkamadda taasoo go'aamin doonta in lagu sii daynayo iyo in lagu tarxiilayo.



**Bogga kan xiga, waxaad ka arki doontaa Talaabada 2 aad ee hanaanka xiritaanka ee dadka u xiran arrimaha maamulka.**



## Hadda talaabo qaad!

Marxaladaan nidaanka tarxiilka kamidka ah (Tallaabada Koowaad), marka lagu soo xiro marka koowaad, waa muhiim inaad talaabo qaadaa. Arrintaan waxay ku xirantahay nooca dukumiintiga aad haysato. Hoos, ka hel warbixinta saxda ah ee ku saabsan xaalada dukumiintiyadaada, sidoo kalena raac macluumaadka si aad u fahamto waxa lagaa doonayo inaad samayso.

### Waxaan haystaa dukumiintiyo sax ah

(waxaa kamid ah aqoonsiga qaxootida, fiisaha magangalyo doonka, fiise nooc walba oo sax ah oo uu kujiro ZEP)

**Waxaad samaynayso** ▷ Tus sarkaalka koobiga saxda ah ama asalka fiisahaaga/oggolaanshaha/PDFka fiisaha elektorooniga ah/iimaylada

**Maxaa Dhacaya intaas Kaddb** ▷ Waa in lagu sii daayaa - laakiin waa kaliya marka sarkaalku uu si buuxda u hubiyo dukumiintiyadaada aqoonsiga

**Ogaysiis muhiim ah** ▷ Haddii uusan ku sii daynin, raadso caawimaad dhanka sharciga ah. Haddii aadan dukumiintiga wadan, weydiiso sarkaalka in qof kuu keeni karo dukumiintiyadadada. Haddii uusan kuu ogolaan, u sheeg inuu xaaladaada ama aqoonsigaaga ku hubiyo 48 saacadood gudahood. Waxaa lagu sii dayn doonaa marka dukumiintigaaga la keeno xaaladaadana la hubiyo. Haddii uusan ku sii daynin, raadso caawimaad dhanka sharciga ah. Eeg bogga 15 aad ee hagahaaga.



# Nidaamka tarxiilka



## Tallaabada koowaad

**Xiritaanka sarkaal ka socda laanta socdaalka ama booliska**



Kaliya sarkaal boolika ama laanta socdaalka ka socda aya aku weydiin kara dukumiintiyadaada si aad u cadayso inaad Koonfur Afrika ugu nooshahay si sharci ah. Haddii uu haysto 'qodobo macquul ah' (sababo xoogan) oo lagu aamini karo inaad si sharci darro ah ku joogto Koonfur Afrika, waa uu ku xiri karaa inta uu ka xaqiijinayo xaalada aad ku joogto koonfur Afrika, sida caadiga ah waxaa laguugu xirayaa saldhiga booliska.



Wuxuu ku xiri karaa kaliya 48 saacadood kaddib marka uu ku hubiyo, waana in maxkamad laguugu keenaa 48-daas saacadood gudahoodaama maalinta xigta ee shaqadu socoto haddii ay kusoo aado maalmaha nasiinada todobaadka ama fasaxyada guud.



Haddii baaritaankiisu soo baxo inaad tahay 'ajanabi sharci darro ku jooga,' sarkaalka ka socda laanta socdaalka ayaa kugu ogaysiinaya si qoraal ah, in laguugu dacweynaayo inaad tahay 'ajanabi sharci darro ah'. Intaas kaddib, waxaa lagu gayn doonaa maxkamadda. Xsuusnoow, waa in arintaanu ku dhacdaa 48 saacadood gudahood.




Haddii aan maxkamadda laguugu keenin 48 saacadood gudahood, waxaad xaq u leedahay in si degdeg ah laguu sii daayo.

**Hadda talaabo qaad!**


**Waa muhiim inaad talaabo qaado aadna hesho kaalmo sharci marka aad kujirto marxalaadan nidaamka! Wax badan ka ogow bogga kan xiga.**





## Talaabada labaad

**Kasoo muuqashada maxkamadaha garsoorka**



Boolisku wuxuu ku gayn doonaa maxkamada maamusha xabsiyada kahor inta aadan garsoorka kasoo hor muuqan. Garsoorku wuxuu go'aamin doonaa inaad tahay muwaadin ajanbi ah iyo hadday sidaas tahay, inaad haysato sabab sax ah oo aad wadanka ku joogto iyo in kale.



Maxkamada dhexdeeda, waa muhiim inaad haysatokaalmo sharci. Waxaad xaq u leedahay qareen ama inaad caawimaad codsato. Maxkamada dhexdeeda, waxaa inaad ugu sharaxdaa xaalada dukumiintigaaga qareenkaaga iyo garsoorka (xaakimka). Daacad ahoow oo bixi macluumaadka ugu badan ee ada awoodo. Haddii xaakimku rumaysto inaad haysato sababo sax ah oo aad ku joogto Koonfur Afrika, wuxuu:

- amri doonaa in lagu sii daayoama,
- amri doonaa sii dayntaada sidoo kalena fari doonaa Wasaarada Arrimaha gudaha (Home Affairs) inay dukumiintiyada kaa caawiso.



Haddii sababahaag saxda ah ee joogitaanka Koonfur Afrika aysan caddayn, maxkamadu waxay u ogolaan kartaa Wasaaradda Arrimaha gudaha (Home Affairs) inay samayso baaritaan dheeraad ah iyo, hadii sabab jirto, in lagu xiro ilaa aad si rasmi ah uga codsanayso magangalyo. Waxaad xabsiga kusii jiri kartaa ilaa maxkamada lagaaga soo celinayo.



Haddii xaakimku rumeysto inaadan haysan sababo sax ah oo aad ku joogto Koonfur Afrika, wuxuu:

- kordhin doonaa xabsigaaga tarxiilka, asaga oo ku waafaqayaWasaarada Arrimaha gudaha (Home Affairs) ama
- ku sii dayn doonaa si laguu diyaariyo tarxiila ayada oo aan lagu xirin, xaalada gaar ah awogood.

Haddii xaakimku ogolaado in laguugu eedeeyo qodobada Section 49, arintaan waxaa loo yaqaanaa fal danbiyeed (ma ahan xiritaan) maamul. Haddii danbiga laguugu helo waa inaad qaadataa xukun xabsi ah ama bixisaa ganaax kahor inta aan midkood lagu tarxiilin ama aadan dukumiinti helin, gudaha Koonfur Afrika. Haddii aysan nabadgalyadadau ku jirin inaad wadankaagii ku laabato, waa inaad ka hor timaadaa xiritaanka. Fadlan ka raadso kaalmo caawimaad sharci ah.

3 

# Talaabada saddexaad

**Haddii lagu tarxiilo, gayntaada Lindela**




Haddii lagu tarxiilayo, waxaa laguugu haynayaa saldhiga booliska.



Guud ahaan, waxaad sugi doontaa ilaa lagaa gaynayo Lindela Repatriation Centre, oo u dhow Johannesburg. Mararka qaarkood waxaa lagaa tarxiilayaa saldhiga booliska adiga oo aan tagin Lindela, laakiin arintaani waxay inta badan dhacdaa marka lagaa soo celiyo waddan daris ah.




Haddii xabsigaagu ka bato 120 maalmood, waxada xaq u leedahay in lagu sii daayo.



Lindela Repatriation Centre waa xarunta tarxiilka ee Koonfur Afrika ugu weyn. Waxay u dhowdahay Johannesburg.



## Ma ogtahay?

**Nidaamka tarxiilku inuu qaadan karo ilaa 120 maalmood, laga bilaabo marka lagu xiro. Haddii aan lagu tarxiilin 120 maalmood kaddib, waxaad xaq u leedahay in lagu sii daayo.**




## Xaquuqdaada marka aad xirantahay

Waa muhiim inaad xasuusnaato in, gudaha Koonfur Afrika,qof walba uu xaq u leeyahay inta uu xiran yahay. Muhiim ma ahan meesha aad ka timid, ama inaad haysato dukumiintiyo ama aadan haysan - waxaad leedahay xaquuqahaan. Marka lagu xiro, waxaad xaq u leedahay:

- Inaad ogaato sababta laguu xiray.
- Inaad qof wacato. Haddii lagu xiro waxaad codsan kartaa inaad isticmaasho taleefoonka saldhiga booliska.
- Qareen (ama caaawimaad Sharci NGO/Xarun Sharciga qaabilsan, haddii aadan awoodin qareenka), iyo tarjumaan maxkamadeed.
- In laguula dhaqmo si sharaf leh (oo ay kujiraan meel aad degto oo wanaagsan / cunto / daryeel caafimaad).
- In laguugu sheego xaquuqahaaga macluumaadkana laguugu siiyo luuqad aad fahmayso.
- In ay kusoo booqdaan qoyskaagu / la taliyeyaasha diinta / dhaqaatiirtu.
- In laguugu hayo meel ka baxsan dadka danbiyada looga shakisanyahay.

**Haddii aan xaquuqahaaga la ilaalin, codso caawimaad sharci. Waxaad ka heli doontaa ururada kugu caawin kara macluumaadka dheeraad ka ah bogga 15 aad ee buugaan.**

**Xasuusnoow, mar walba qaado koobiyada dukumiintiyadaada!**







## 4 Talaabada afaraad

**U tarxiilista wadanka qofku kasoo jeedo**

Wasaarada Arrimaha gudaha (Home Affairs) woo diyaarinaysa laabashadaada. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato waxa soda; xiliga iyo qaabka laguu tarxiilayo.

Waxaa laguugu tarxiili karaa bas ama siyaarad. Xasuusnoow, haddii xabsigaagu ka bato 120 maalmood, waxaad xaq u leedahay in lagu sii daayo.

Kaddib markii lagu tarxiilo, waxay u dhowdahay in laguu aqoonsado 'qof aan laga rabin' (mamnuuc ka ah kusoo laabashada Koonfur Afrika) muddo shan sanno ah, arintaanina waxay saameyn kartaa codsiyadaada fiiseyaasha mustaqbalka, xaataa marka mamnuucista lagaa qaado.



# Diyaarinta laabashada iskaa ah

Mararka qaarkood, waxaad diyaarsan kartaa inaad ku laabato wadankaagii si iskaa ah.

Xaaladaha qaarkood, waxada diyaarsan kartaa inaad iskaga tagto Koonfur Afrika si iskaa ah haddii aad awoodo inaad:

- Keento dukumiinti aad ku safarto oo sax ah
- Iibsato tikidh diyaaradeed (inta badan duulimaadyada tooska ah) ee wadankaaga tagaya

Haddii laguu ogolaado, waxaad ku jiraysaa xabsiga ilaa laga gaarayo wakhtiga duulimaadkaaga waxaana garoonka ku dhexmarinaya laanta socdaalka. Saaxiibadaada iyo qoyskaagu waa inay hubiyaan in alaabtaadu ay garoonka taalo si aad duulimaadka u raacdo. Haddii aad awoodo inaad diyaarsato safarkaaga ku laabashada wadankaagii, aad ayaan kuugula talinaynaa inada sidaas samayso - haday ammaan kuu tahay ku laabshadiisu. Diyaarinta laabashadaadu waxay inta badan soo gaabinaysaa mudada xabsigaaga.

**Xasuusnoow!**

**Dadka magangalyo doonka ah (hadii ay dukumiinti haystaan iyo haddii kaleba) ee qaxootiga ah lamatarxiili karo waxaana ilaalinaya mabda'a ah inaan dib loo celin karin qof magangalyo doon ah. Laguuguma celin karo waddan noloshaada, xoriyadaada, ama xaquuqahaagu khatar galayaan.**





# Nuxurka


**Xaquuqdaada marka aad xirantahay** → Bogga 4

**Nidaamka tarxiilka** → Bogga 6

Hagahaan, waxaan ku eegaynaa tallaabo kasta oo kamid ah nidaamka tarxiilka. Waxaan nidaamka u kala qaadaynaa afar talaabo, laakiin waa uu ka duwanaan karaa taasoo ku xiran hadba xaalada aad kujirto.

1 
**Tallaabada koowaad** → Bogga 6
Xabsiga booliska ama sarkaal ka socda socdaalka

2 
**Talaabada labaad** → Bogga 11
Kasoo muuqashada maxkamada garsoorka

3 
**Talaabada saddexaad** → Bogga 12
Haddii lagu tarxiilo, gayntaada Lindela

4 
**Talaabada afaraad** → Bogga 13
U tarxiilista wadanka qofku kasoo jeedo

**Diyaarinta laabashada iskaa ah** → Bogga 14

**Ururada ku caawin kara** → Bogga 15

## Hagahaanu wuxuu kuu sharaxayaa

1. Nidaamka xabsiga iyo tarxiilka ee Koonfur Afrika (ayada oo loo sababaynayo kaliya arrimaha socdaalka iyo qaxootiga)
2. Waxa lagaa doonaayo inaad samayso haddii adiga (ama qof aad taqaano) la xiro si loo tarxiilo
3. Waa maxay xaquuqahaagu inta ay socoto howsha xiritaanka iyo tarxiilka ah

**I ilaali!**

Hagahaan waxaa kujira tafaasiil iyo macluumaad xiriir oo muhiim ah. Ku kaydso meel ammaan ah una sheeg qofka meesha aad ku kaydisay si, haddii lagu xiro, uu kuugu keeno.

**Muhiim!**

Waxaad ka heli doontaa ururada kugu caawin kara macluumaadka dheeraad ka ah bogga 15 aad ee buugaan.



## Ururada ku caawin kara

Haddii laguu xiro ama xabsi laguu dhigo sababo la xiriira in lagu tarxiilo, waxaan aad kuugula talinaynaa inaad hesho caawimaad sharci. Waxaad xaq u leedahay, inta aad xiran tahay, inay kusoo booqdaan saaxiibada qoyska, la taliyayaasha diinta kuwaa soo kaa caawin kara sidii aad ku heli lahayd caawimaad sharci oo laguugu tala galay. Haddii lagu xiro si laguu tarxiilo aadna awoodin qareen, waa inaad sidoo kale la xiriirtaa ururada aan faa'ido doonka ahayn, ee hoos ku qoran.

**National Immigration Detention Hotline**

- 081 716 8791
- 0800 079 614 (bilaash ku wac)

**Lawyers for Human Rights (Durban)**

- 031 301 0531

**Nelson Mandela University Refugee Rights Centre (Gqeberha)**

- 041 504 1310 or 041 504 4705

**University of Cape Town Refugee Rights Clinic (Cape Town)**

- 021 650 5581
- 078 594 5591

**The Scalabrini Centre of Cape Town**

- 021 465 6433
- 078 260 3536



Funded by the European Union

Contracted by

This document was produced with the financial assistance of the European Union, contracted by ICPMD through the MMD Grant Facility. The contents of this document are the sole responsibility of the Scalabrini Centre and can under no circumstances be regarded as reflecting the position of the European Union or ICMPD.

Somali

# Hagaha ku saabsan fahamkaaga nidaamka tarxiilka ee Koonfur Afrika

Scalabrini
Centre of Cape Town

